**DOWLADDA SSC-KHAATUMO EE SOOMAALIYA**

**Wasaaradda Maaliyadda**

**SSC-KHAATUMO STATE OF SOMALIA**

**Ministry of Finance**

**Xafiiska Wasiirka**

**Tixraac: SSC/WM/XW/XN007/2024** **Taariikh: Abriil 1, 2025**

# XEER-NIDAAMIYAHA AJUUROOYINKA ADEEGAYADA CAAFIMAADKA,

**Isagoo fulinaaya** mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2(4) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee la xiriira dabagalka dakhliga;

**Isagoo u hoggaansamaya** mabda'a lagu sheegay Qodobka 3 (7) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda iyo hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo waxku'ool ah;

**Markuu arkay** Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, iyo Xeerka Tacrifadda Cashuuraha Berriga;

**Isagoo gudanaya** awoodaha lagu siiyey Qodobka 88(1) ee Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqangeliyo sharciyada dakhliga;

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

## Qodobka 1aad
## Jaangoynta Ajuurooyinka Adeegyada Caafimaadka

1. Ajuurooyinka iyo khidmadaha lagu sheegay jaantusyada hoose ayaa noqon doona kuwa la dabaqayo marka uu dhaqan galo Xeer-nidaamiyahaan:

### 1.1 Ajuurooyinka Shatiga Goobaha Caafimaadka

| Madax/Xige | Shaxda 1.1 Ajuurooyinka Shatiga | Diiwaangalin | Cusboonaysiin |
|---|---|---|---|
| | Farmasiyaha gaar ah (Heerka: A, Jumlo) | $1000.00 | $500.00 |
| | Farmasiyaha gaar ah (Heerka: B, Tafaariiq) | $500.00 | $250.00 |
| | Farmasiyaha gaar ah (Heerka: C, Tafaariiq) | $200.00 | $100.00 |
| | Rug Dhakhtar heer (Polyclinic) Leeyahay Muwaadin | $350.00 | $200.00 |
| | Rug Isbitaal (Heerka A) | $1000.00 | $500.00 |
| | Rug Isbitaal (Heerka B) | $500.00 | $300.00 |
| | Rug Isbitaal (Heerka C) | $350.00 | $200.00 |
| | Rug Dhakhtar Ajnebi ah | $2,000.00 | $1,000.00 |
| | Rug Ummuliso Gaar ah | $200.00 | $100.00 |
| | Rug Shaybaadh Gaar ah | $200.00 | $100.00 |
| | Rug Raajo (X-ray) Gaar ah | $250.00 | $100.00 |
| | Shirkadda Soo Dejiya Daawooyinka (**Medical** | $1000.00 | $500.00 |

| Madax/Xige | Shaxda 1.1 Ajuurooyinka Shatiga | Diiwaangalin | Cusboonaysiin |
|---|---|---|---|
| | **Wholesales**) | | |
| | Shirkadda Soo Dejiya Qalabka Caafimaadka (**Medical Wholesales**) | $1000.00 | $500.00 |
| | Rug Ilkaha (Dentiste) oo gaar ah | $ 450.00 | $250.00 |
| | Rug Isbitaal oo Indhaha ah | $500 | $300 |
| | Rug Indhaha oo gaar ah (optometrist) | $250.00 | $150.00 |
| | Dhakhtar Tababar (Teaching Hospital) | $1000 | $600 |
| | | | |

## 1.2 Ajuurooyinka Shatiga Xirfadlaha Caafimaadka (Sannadle)

| Madax/Xige | Shaxda 1.2 Ajuurooyinka Shatiga Xirfadlaha Caafimaadka | Muwaadin | Ajanabi |
|---|---|---|---|
| | Specialist Practitioner | $250 | $600 |
| | General Practitioner | $200 | $400 |
| | Dentist Practitioner | $200 | $300 |
| | Ophthalmologist practitioner | $200 | $300 |
| | Anesthesiologist practitioner | $200 | $300 |
| | Bachelor Degree of Clinical Officer | $80 | $200 |
| | Bachelor Degree of Nursing | $60 | $150 |
| | Bachelor Degree of Midwifery | $60 | $150 |
| | Bachelor Degree of Laboratory | $60 | $150 |
| | Bachelor Degree of Pharmacist | $60 | $150 |
| | Bachelor Degree of Public health | $60 | 150 |
| | Bachelor Degree of Nutrition | $60 | 150 |
| | Bachelor Degree of Anesthesiologist | $60 | 150 |
| | Allied Health (AN, ULS, PHYT, RADIOLOGY, OPTHMETRICS etc) | $60 | $150 |
| | Diploma of Clinical Officer | $50 | Looma Baahna |
| | Diploma of Dentist and ophthalmology Tech | $50 | Looma Baahna |
| | Diploma of Nursing | $40 | Looma Baahna |
| | Diploma of Midwifery | $40 | Looma Baahna |
| | Diploma of Laboratory tech | $40 | Looma Baahna |
| | Diploma of Pharmacist tech | $40 | Looma Baahna |
| | Diploma of Nutritionist | $40 | Looma Baahna |
| | Diploma of Public health | $40 | Looma Baahna |
| | Diploma of Anesthesiologist | $40 | Looma Baahna |
| | Diploma of Allied Health (AN, ULS, Phyt, Radiology, Opthmetrics etc) | $40 | Looma Baahna |
| | Certificate of Nursing | $30 | Looma Baahna |
| | Certificate of Laboratory tech | $30 | Looma Baahna |
| | Certificate of Pharmacist tech | $30 | Looma Baahna |
| | Certificate of Allied Health (Nutrition, Opthmetrics, ETC) | $30 | Looma Baahna |

## 1.3 Ajuurooyinka Shatiga Haamaha Neefta (Oxygenta)

| Madax/Xige | Shaxda 1.3 Haamaha Neefta (Oxygenta) | Qiimaha ($) |
|---|---|---|
| | Ajuurada Haanta Neefta (Oxygen) 25 kg | $20 |
| | Ajuurada Haanta Neefta (Oxygen) 10 kg | $10 |

**Qodobka 2aad**

**Bixinta iyo Ururinta Ajuurooyinka iyo Khidmaddaha**

1. Ajuuradda iyo khidmadda waxaa ururinaya shaqaalaha/saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda ee loo idmay ee ku sugan Xarumaha Cashuuraha Berriga ama Wasaaradda Caafimaadka.

2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaya ujuurooyinka iyo khidmaddaha waxaa la farayaa in ay ku shubaan lacagahaas akoonada Khasnadda Mideysan ee Wasaaradda Maaliyaddu u cayintey dakhliga ajuurooyinka Wasaaradda Caafimaadka.

**Qodobka 3aad**

**Warbixinta Korjoogtenta Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha**

1. Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay korjoogteysaa u hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyahaan, oo ay soo saartaa warbixin joogto ah oo ay la wadaageeyso Wasiirka Maaliyadda.

**Qodobka 4aad**

**Dhaqangelinta Xeer-nidaamiyahaan**

1. Xeer-nidaamiyaha Ajuurada Adeegga Wasaaradda Caafimaadka waxa uu dhaqangelayaa taariikhda uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

2. Nuqullada Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda iyo midka Wasaaradda Caafimaadka.

***Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad***

***Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dawladda SSC Khaatumo***

***Saxeex:*** ____________________